




VALG

Golaha degmada iyo
Doorashada golaha deegaanka 2023

Somali / Soomaali

Xog muhiim ah Adiga doonaya inaad codayso

Maalinta doorashada waa 11 Sebtembar,
Xusuusnow aqoonsigaaga.



valg.no

VALGdirektoratet

Golaha degmada iyo Doorashada golaha deegaanka 2023

Afartii sanaba mar ayaanu dooranaa cidda noo Matali doonta degmooyinka iyo gobolada.

Golaha degmada waxaa laga soo saaraa go'aamo ku saabsan arrimaha deegaanka. Tani waxay khusaysaa sida, xanaanadaha, dugsiyada hoose, adeegyada caafimaadka iyo daryeelka, ilaalinta ilmaha, tallaabooyinka dhaqanka iyo dayactirka.

Hawlaha maamulka gobolka, waxaa ka mid ah waxbarashada dugsiyada sare, Waddooyinka gobolka oo leh dariiqyada doomaha, gaadiidka dadweynaha ee deegaanka iyo hindisaha dhaqanka.

Oslo waxaa ka jira doorashooyin golaha degmada iyo guddiyada degmooyinka, laakiin maalaha doorashada golaha deegaanka heer gobol.

Warbixintan qoraalka ah waxaa ka helaysaa macluumaadka ku saabsan Doorashooyinka iyo sida loo codeeyo.

Maalinta doorashadu waa Isniin 11. Sebtembar 2023

Degmooyin dhan waxaad sidoo kale codayn kartaa axadda 10. Sebtembar. Waxaad sidoo kale ka codayn kartaa meel kasta oo dalka ka mid ah laga bilaabo 10. Agoosto ilaa 8. September. **Xusuusnow aqoonsigaaga.**



Xusuusnow aqoonsigaaga marka aad codaynayso

Waa inaad muujisaa aqoonsi markaad codaynayso.

Aqoonsiga waa inuu ka kooban yahay magaca, tariikhda dhalashada iyo sawirka, oo waxay noqon kartaa tusaale ahaan, baasaboor, kaarka aqoonsiga qaranka, liisanka darawalnimada ama kaarka bangiga oo sawir leh.

Ma waxaad joogta machad caafimaad ama guryaha kalkaalinta, isbitaal ama xabsiga, waxaad heli kartaa shaqaale xaqiijiya aqoonsiga. Shaqaaluhu waa inuu markaa sitaa aqoonsi.



Yaa wax dooran kara?

- Muwaadiniinta Norway ee 18 jirsaday ama ka weyn gudaha sanadka 2023, ama ka diiwaan gashan deganansho dalka Norway. Muwaadiniinta Denmark, Finland, Iceland ama Iswidahan ee 18 jirsaday gudaha sanadka 2023. Dadka aan haysan dhalashada Norway, balse gaaray da'da 18 sano gudaha sanadka 2023, isla markaana ku diiwaan gashan diiwaanka dadweynaha inay Norway deggan yihiin saddexdii sano ee ugu dambaysay ka maalinta doorashada.



Goorma iyo halkee ka codayn kartaa?

Waxad hore u codayn kartaa laga bilaabo 10ka Agoosto ilaa 8 sebtambar degmo kasta.

Maalinta doorashada, waa inaad ka codaysa degmada aad ka diiawangashan tahay inaad deggan tahay 30ka juun 2023. Waxaad ka codayn karta goob kasta oo codbixineed oo ku taal degmada.

Ma codayn kartid xilliga hore codbixinta ama maalinta doorashada? Markaad waxaad waydiisan kartaa degmadada inay codayn hore sameyn kartid laga bilaabo 1da Luulyo ilaa Sebtembar 3.

Waxa kale oo suurtoagal ah in laga codeeyo dibadda laga bilaabo 1da Luulyo ilaa sebtambar 3.



Ka hel goobtada codbixinta **valglokaler.no**



Kaarka doorashad

Kaarka doorashada waa xaqijinta inaad xaq u leedahay inaad codayso. Waxa kale oo ku qoran meesha iyo goorta aad ka codayn karto maalinta doorashada. Kaarka doorashada aqoonsi ahaan uma shaqaynayo, uma baahnid kaarka doorashada si aad u codayso.

Kaarka doorashada waxa loo soo diraa sanduuqa boostada dhijitaalka ah ama Altinn. Ma iska xirtay, xagga isgaarsiinta dhijitaalka ah ee qaybta dadweynaha, ama miyaadan isticmaalin "ID-porten" 18 bilood, waxaa lagugu soo diri doona kaarka doorashada warqad.

La xiriir degmadaada haddii aanad helin kaarka doorashada, ama aanad hubin inaad xaq u leedahay inaad codayso.



Sidaan ayaad u codaynaysaa

Haddii aad ka codayso meel ka baxsan degmadada, waxaad heli doontaa warqad codbixin ah oo ku qoran yihiin magacyada xisbiyada siyaasadda ee diiwangashan. Waa in aad saxdo oo doorato xisbiga aad doonayso inaad u codayso. Warqada codbixinta ayaa waxaa ka maqan magacyada musharaxiinta xisbiyada. Sidaa darteed ma samayn kartid wax ka beddelka waraaqadan codbixinta.

Haddii xisbiga ama kooxda aad doonayso inaad u codayso aanay ku qornayn warqadda codbixinta, waxaad ku qori kartaa magaxa xisbiga ama ururka. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa warqadda codbixinta degmadaada doorashada, oo isticmaal haddii aad rabto inaad isbedel sameyso. Codeynta waxaa loo diraa degmadada si loo tiriyo. Isla sidaas oo kale ayaa khuseeya haddii aad ka codaynayso meel ka baxsan gobolkaaga doorashada golaha degaanka gobolka.

Haddii aad jirran tahay ama aad naafo tahay, waxaad la xiriiri kartaa degmada si aad hore ugu codayso guriga. Degmada ayaa kugu wargelinaysa waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga.

Haddii aad ka diiwan gashan tahay degmo ama gobol ay samaysay dib u habaynta degmooyinka iyo gobolada, waa inaad doorata wakiilada golaha degmada iyo maamulka gobolka ee degmooyinka iyo gobolada cusub.

Caawinta codbixinta goobta codbixinta


La xariir sarkaalka doorashada haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay hanuunin marka la codeynano. Sarakiisha doorashada waxaa saaran waajibad sir qarín ah.

Haddii aad leedahay naafo maskaxeed ama jireed oo macnaheedu yahay inaad codayn karin kaligaa, waxaad xaq u leedahay in lagu caawiyo. Waxaad caawimaad ka heli kartaa codbixinta sarkaalka doorashada ama qof kale oo aad adigu doorato.


Sidaan ayaad ugu codayn kartaa degmadaada




1) Qaado warqada codbixinta ee aad doonayso inaad isticmaasho: Mid doorashada golaha deeganka degmada iyo mid doorashada golaha deeganka gobolka, haddii aad doonayso inaad ka codayso labada doorasho.




2) Haddii aad rabto inaad bixiso codad shaqsiyeed, waxaad saxan kartaa sanduuqa ku xiga liiska musharixiinta ee ku yaal warqadda codbixinta ee aad rabto inaad siiso cod shaqsiyeed. Waxaad siin kartaa cod shakhsi ah inta musharax ee aad rabto (eeg tilmaamaha bogga xiga).



3) Laab warqada codbixinta oo magaca xisbiga ku dhex jiro, iyo goobta laga shaabadeynayo – markaas qofna ma arki karo waxaad u codeyneyso. Baqshad ama dabool kale waa inaan loo isticmaalin hareeraha waraaqaha codbixinta.



4) U tag sarkaalka doorashada oo hel shaambada waraaqaha codbixinta. Tani waxay muhiim u tahay in codeynta la ansaxiyo.



5) Ku rid warqadaha codbixinta sanduuqa codbixinta. Oslo waxa ka dhaca doorashooyin golaha hoose iyo golaha degmada, ma jiraan doorashooyin heer gobol. Haddii aad ka diiwan gashan tahay degmada Oslo oo aad rabto inaad ka qayb qaadato doorashada guddiga degmada, waxaad isticmaali kartaa warqadda codbixinta doorashada guddiga degmada oo aad la timid ama warqad madhan oo aad ku qorto magaca xisbiga/kooxda aad u codeynayso. Haddii aad isticmaasho xaashi maran, waa inaad sidoo kale ku qortaa inuu codkaago khuseyo doorashada guddiyada degmada.

Isbeddelka Warqadda codbixinta


Haddii aad rabto inaad saameyn ku yeelato musharaxiinta la xulayo, waxaad siin kartaa mid codka qof ahaaneed ee musharaxiinta aad rabto inaad helo cod shakhsi ahaaneed. Adiga ayay ku xiran tahay haddii aad rabto inaad beddesho warqadda codbixinta adigoo siinaya cod shakhsi ah. Habka bixinta codadka shakhsiga sidoo kale wuxuu ku yaala warqadda codbixinta.

Sida loo bixiyo cod shaqsiyeed:



Doorashada golaha deegaanka degmada:

1) Iskutallab ku dheji sanduuqa ku xiga magaca musharaxa aad rabto inaad siiso cod shakhsi ah, waxaad siin kartaa cod shakhsi ah inta aad rabto.



2) Ku qor magacyada murashaxiinta xisbiyada/kooxa kale meel gaar ah oo warqadda codbixinta. Immisa magac oo musharax ah oo aad ku qori karto ayaa ku qoran warqadda codbixinta. Fadlan ogow haddii aad siiso cod shakhsi ah musharax qof kale kooxda xisbiga, waxa loogu yeeri liiska codeynta, waxaa loo wareejin doona dhinaca kale. Tani waxay saamayn kartaa qaybinta xilalka golaha degmada.



Doorashada golaha deegaanka gobolka:

Iskutallab ku dheji sanduuqa ku xiga magaca musharaxiinta aad rabto inaad siiso cod shaqsiyeed. Waxaad siin kartaa cod shakhsi ah inta musharax ee aad rabto.

Yaa la dooranayaa?

Marka la tiriyo dhammaan warqadaha cod bixinta, guddiga doorashada ayaa ogaanaya inta wakiil ee xisbiyada ama kooxaha kala duwan ay ka heleen maamulka degmada ama maamulka gobolka. Guddiga doorashada ayaa markaas tirinaya codadka shaqsiga ah si ay u ogaadaan musharaxiinta la doortay.

Waxaa daabacay 2023 Hay'adda Doorashooyinka Norway.
Daabacaadda ayaa sidoo kale lagu heli karaa Nynorsk, af sami iyo toban luqadood oo ajnabi ah.

Wixii macluumaad dheerad ah oo ku saabsan doorashada, valg.no



Sawir koodka QR-ka si aad warbixintan ugu hesho luqado kale.